

Ma waxaad cabsi ka qabtaa in guur lagugu khasbo?

Waxaad xaq u leedahay in aad doorato qofka aad nolosha la qaadanaysid. Ha noqon mid keli ku noqota dhibkeeda!

Waa maxay guurka khasabka ah?

Hadii ay gabar nin guursanayso ama wiil gabar guuranaayo oo aanay diidi karin ama uusan diidi karin guurkaas ama ka hortagi karin guurkaas, markaas arintaas waxay noqoneysaa khasab guur ku dhacaya. Arinta la fiirinayaa waa qofka wax guursanaya dareenka uu ka qabo guurka.

Guurka khasabka ah wuxuu ka soo horjeedaa xuquuqul aadamaha!

«Guur wuxuu dhici karaa marka ogolaasho buuxda oo madaxbanaan uu qofka wax guursanayaa reeka ku aasaaso» (Qeexida guud ee xuquuqul aadamaha ee 1948, qodobka 16aad, qaybtiisa 2aad)

Guurka khasabka ah sharciga hadii la eego waa mamnuuc!

Wadankan Switzerland qof kasta wuxuu xaq u leeyahay ama waxay xaq u leedahay in iyaga ay go'aansadaan qofkii ay guursan la'haayeen. Ma jiro qof guurka lagu qasbi karo, ama xukun xabsi ayuu qofka mutaysan karaa ilaa iyo 5 sannadood oo meherkaa/guurkaasna ka soo qaad ma leh xitaa haddii meherka/guurka uu ka dhaco wadanka dibaddiisa.

Waa laga hortagi karaa arinta ah guur khasab ah!

Marwalba waxaa jira dad ku caawin kara, kuwaas oo xaaladaada si fiican u yaqaan kuwaas oo fahansan dhaqankaaga!

Meelo badan oo waxaa jira dadka lagala taliyo oo khibrad u leh arimahaan adag ee nolosha saameynaya. Dadkaas ayaa adiga kaa caawin kara sidii aad noloshaada adigu gacanta ugu dhigi laheyd, iyo talaabooyinka aad ku gaareyso go'aanada noloshaada.

Waxaad xaq u leedahay adigu in aad gaarto go'aanada noloshaada. Hadaba doono caawinaad, si aad u dhabayso waxaad raadineysid.

Hadii uu dhib deg deg ku qabsado waxaad waci kartaa



**Police-ka
117**

**Hoyga-magangalka ee
Haweenka Basel
(Frauenhaus Basel)
Telfoon 061 681 66 33**

(wuxuu 24/7, u furan yahay haweenka ay da'doodu ka wayn 18 sanno jir)

Talooyinka aad heli kartid

www.zwangsheirat.ch

Waxaad kula xiriiri kartaa telefon ama mail. Tiimka la taliyaasha ee ah kuwa dhaqamobadan aqoon uleh <zwangsheirat.ch> waxaa waajib ku ah in ay ilaaliyaan ama xafidaan sirta qofka. La talintu waa lacag la'aan Waxaad talo heli kartaa habeenkii iyo weekends.

Kuwa caawiya dadka la dulmay ee labada gobol ee Basel (Opferhilfe beider Basel) Telfoon 061 205 09 10

La talinta dadka dulman ee labada gobol ee Basel waa lacag la'aan, hadii aad doontana waa la dabooli/la qarintaa. Dadka hawlahaan ka shaqeyaa oo ah kuwo khibrad leh waxaa waajib ku ah in ay arimaha hawshooda amaano ahaan u xifdiyaan.

Adeegga La Talinta Dhalinyarta JuAr (JuAr Jugendberatung) Telfoon 061 683 08 / 882

Saacaddaha telfoonka: Arbaco 2.00pm – 4.00pm
Adeegga La Talinta Dhalinyarta waxay taageero siiyaan dhalinyarta iyo dhalinta qaangaarka ah ee la tacaalaya dhibaatooyinka iyo arrimaha da'da la xiriirta.

Talooyinka aad heli kartid

Akhbaar, talo iyo caawinaad laga caawiyo dhibka ay qabaan gabdhaha iyo wiilasha da'doodu ku eg tahay 18 sano

- Meesha qaabilsan ilaalinta ilmaha iyo dhalinyarada ee Basel-Landschaft (Fachstelle Kindes- und Jugendschutz Basel-Landschaft) Telfoon 061 552 59 30
- Adeegga Dhalinyarta iyo Dhallaanka ee Basel-City (Kinder- und Jugenddienst Basel-Stadt) Telfoon 061 267 45 55

Hawlaha ajaanibta ee Baselland ald (Ausländerdienst Baselland ald) Telfoon 061 827 99 10

Wada hadalka ugu horeeya ee ah mid aan rasmi ahayn waxaad si kalsooni ah ugu tagi kartaa meesha la taliyaasha.

La talinta ajaanibta ee GGG (GGG Ausländerberatung) Telfoon 061 206 92 22

La hadal kuwa la taliyaasha ah ee u leh aqoon iyo khibrad labada dhaqan.

Impressum

GGG Ausländerberatung

ald
Ausländerdienst
Baselland


SICHERHEITSDIREKTION
BASEL-LANDSCHAFT
Fachbereich Integration



Kanton Basel-Stadt

- Fachstelle Diversität und Integration
- Fachstelle Häusliche Gewalt

Unterstützt durch:

 Schweizerische Eidgenossenschaft
Confédération suisse
Confederazione Svizzera
Confederaziun svizra

ERNST GÖHNER
STIFTUNG

JACQUELINE
SPENGLER
STIFTUNG

Soo saaraha iyo taageeraha mashruuca: indigo-design.ch

Ogolaasho farxad leh Service de la Cohésion Multiculturelle Neuchâtel (COSM)



«Go'aanka guurka adigaa islka leh, qofka aad guursaneysidna adigaa dooranaya!»